



Guddoomiyaha gobolka oo saxiixay sharciga dhexdhedaadnimada internet-ka isaga oo jooga Dugsiga Dhexe ee Mt. Tabor.

Munaasibada ka dhacday Dugsiga Dhexe ee Mt. Tabor, Guddoomiyaha gobolka ee Kate Brown ayaa ku saxiixay Sharcigii La Soo Jeediyyay ee 4155. Sharciga cusub, oo jawaab u ah ka noqoshada Guddiga Isgaarsiinta Federaalka ee ilaalinta dhexdhedaadnimada internet-ka ee ay gaartay Diisambar, kaasi oo sharci darro ka dhigaya hay'adaha gobolku la shaqeeyo bixiyeyaasha adeega internet-ka ee isticmaala dhaqanka takoorka ku dhisan, sida mudnaansiinta lacagta la siiyay iyo xayiraada hadalka.

Munaasibadu waxay ka dhacday Mt. Tabor sababta oo ah hoggaanka ku saabsan arrinka ee ay muujiyeen ardayda fasallada toddobaad ee Athena Wooters, Lola Hatakeyama iyo Luca Larsen Utsumi, kuwaasi oo ka markhaati furay guddiga sharci dejinta hortooda ee ku taala Salem

Sidoo kale dadka ka soo qayb galay munaasabaddii Isniinta waxay ahaayeen Xeer Ilaaliyaha Guud ee Oregon Ellen Rosenblum, Hoggaamiyaha aqlabiyyadda aqalka ee Jennifer Williamson, Rep. Allisa Keny-Guyer (oo ay degmadeeda ka mid tahay Mt. Tabor), Kormeeraha Guud ee PPS Guadalupe Guerrero iyo Guddoomiyaha Guddiga PPS Julia Brim-Edwards. Rosenblum iyo Brim-Edwards labaddooduba waxay leeyihiin carruur dhigata Mt. Tabor.

Marka lagu daro munaasibada, dhowr xubnood oo ka tirsan xisbiga ayaa booqday fasalka Matthew Bacon-Brenes, Macallinka Sanadka ee Oregon.